



## (Qofka ka dab qaata wax cilmiga xidigaha ka mida wuxuu ka dab qaatay qayb sixirka ka mida, wuxuu doono ha ku darsado)

Ibnu Cabbaas Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiiye wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay scw wuxuu yiri: (Qofka ka dab qaata wax cilmiga xidigaha ka mida wuxuu ka dab qaatay qayb sixirka ka mida, wuxuu doono ha ku darsado).

[Xadiis Saxiix ah] [Waxaa wariyay Abuu Daa'uud Ibnu Maajah iyo Axmed]

Nabigu scw wuxuu cadeeyey in qofka wax ka barta ee ka qaata cilmiga xidigaha iyo abraajta dadka looga faaliyo kaasoo ay u daliishanayaan socodka xidigaha, soobixidooda iyo dhicidooda wax yaabaha dhulka ka dhacaya sida dhimashada qofka, noloshiisa, jiradiisa, iyo wixii la mid ah ee mustaqbalka dhici doona, qofkaasi wuxuu bartay qayb ka mid ah sixirka, mar walba oo uu sii bartana sixir buu sii badsanayaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5989>

النّجّاة الخيريّة  
ALNAJAT CHARITY



لجنة الدعوة الإلكترونية  
E-Dawah Committee

